

Guud mar: Afarta sanno ee soo socoto, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxay u soo iibsanaa doonaan dhammaan fasalada K-5 agabyo casharo oo cusub sida (manhaj, buug, qalabyo ardayda lagu fahamsiiyo xisaabta, agabyo dijital ah, iwm.). Warsidahanani wuxuu idin siin doonaa wixii cusub ee agabyo casharo waxbarasho, iyo fursadaha aad kala soconaysaan qalabyadaasi idinka oo wixii warcalin ka sameyn doona.

Xisaabaadka K-5

Laga bilaabo dayrtani, ardayda iyo macallimiintu waxa ay isticmaali doonaa manhaj cusub oo xisaab ah kaasi oo la yiraah [Xisaabta Diyaarka ah\(Ready Math\)](#). Sagaalkii bilood ee la soo dhaafay, iyada oo lagu eegey muraayadaha sinnaanta,



Maamulayaasha PPS, macallimiinta iyo shaqaaluhu waxa si xilqaan leh uga shaqeeyeen qiimeynta, tijaabinta goobta lagu sameynayo ayaa ugu dambeyntii Dugsiyada Degmadu waxay agabka cusub ee casharada K-5 u doorteen inuu noqdo Xisaabta Diyaarka ah. Dhammaan qalabkani waxaa lagu turjumay luqadaha Isbaanishka, Ruushka, Shiinaha la fudeydiyey, Jabaaniiska iyo Fiitnaamiska.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan kala xiriir Patrice Woods ee pwoods@pps.net.

Xirfadaha Aasaasiga u ah K-3

Labadii sanno ee la soo dhaafay PPS waxa ay imtixaano ku qaadayeen goobaha iskuulka iyaga oo soo bandhigaya(Aasaaska) [Foundations](#). Sanad-dugsiyeedka 2020/2021, fasalada K-1st waxaa loo qeybinayaa



Aasaasiga(Fundations), iyada oo sanad-dugsiyeedka 2021/2022, fasalka 2aad iyagana loo qeybin doonaa(Aasaasiga) Foundations, iyo fasalka 3aad oo iyagana lagu sameyn doono tijaabada Aasaasiga ah ee goobta iskuulka lagu qaadayo .

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xariir Emma Wang ee hwang@pps.net.

Bani'aadanimada K-5

Sanadkii 2021, PPS waxa ay qandaraas la gashay The Oregon Historical Society (OHS) sidii loo cusbooneysiin lahaa daabacadii 1992 ee magaalada “Portland, Bulshadayada: Akhriska Caruurta”. In dib loo qaabeeyo daabacada waxa ay caawin doontaa iyada oo la jaanqaadeysa Cilmiga Bulshada Oregon, Luqada Ingiriiska, iyo Heerarka Barashada Anshaxa sidoo kale Duruusta Dugsiyada Lagu Qaato ee Salka u ah Manhajka. Afarta daabacadood waxaa ka mid noqon doona: “Portland Waxay Noqotay Magaalo”, Afarta, “Taariikhda Laga Qorey Portland”, laga soo bilaabo waqtigii waayaha magaalada ee bilowgii ilaa maanta”, iyo Raad reebka iyo sheekooyinka Portland. Dugsiyadu waxa ay bilaabi doonaan inay dhigaan daabacadahani inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 2022/2023.



Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xariir Emma Wang ee hwang@pps.net.

Waxbarashada Labada Luqadood Wax Lagu Bartay ee Isbaanish Fasalada K-5 (DLI)

Guddidii dib u eegista ee ka koobneyd wakiilada dhammaan 10-ka branaamij ee Isbaanishka markii la qiimeeyeen, iyada oo Golaha Waxbarashaduna ansixiyey iyaga oo doortay manhaj cusub Isbaanishka lagu dhigayo kaasi oo maxsuulka ka soo baxaya la filayo inuu noqdo mid aad u horumarsan- [Benchmark Adelante/Advanced](#). Agabka waxbarashadu waa mid la jaanqaadaya sida uu u dhan yahay Luqada Ingiriiska iyo Waxbarashada Isbaanishka Lagu diyaariyey ee Heerarka Gobolka, waxayna u addeegsan doonaan sidii loogu badhxi lahaa Luqada Ingiriiska, Barashada Bulshada, Sayniska, Barashada Shucuurta Bulshada iyo qaab ka jawaabaya habka wax loo barbaariyo dhinaca habdhaqanka waxbarashada.



Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xariir Emma Wang hwang@pps.net.